


GU'GA 2025

**N 130TH ST - BITTER LAKE ILAA HALLER LAKE****Hagaajinta Dhaqdhaqaaqa**

Waxaanu hagaajinaynaa badbaadada iyo dhaqdhaqaaqa N 130th St inta u dhaxaysa Palatine Ave N iyo I-5 si aanu dadka ugu xirno mustaqbalka Saldhiga tareenka fudud ee NE 130th St oo aanu ka caawino inay ku soo wareegaan xaafadda. Horumarintani waxay u abuuri doontaa jawi wanaagsan dadka lugaynaya, rogrogaya, baaskiilka kaxaysanaya, ama raacaya gaadiidka, waxayna ka caawinaysaa yaraynta dhaawaca halista ah iyo shilalka dhimashada leh iyado leh naqshad cusub oo wadoyinka ah.

**Horumarinta la qorsheeyay waxaa ka mid ah:**

- Nakhshad la cusboonaysiiyay oo leh haad baaskiil oo la ilaaliyo, haadka leexashada dhexe, iyo hal haad baabuur oo jiho kasta ah (meelaha qaar way ku kala duwan tahay)
- Calaamadaha Baabuurta oo la cusboonaysiiyay oo leh mudnaanta gaadiidka si basaska loo siiyo bilow hore
- Dib u dhiska wadada si wax looga qabto tayada laamiga iyo taageerada adeega baska oo kordhay
- Jid-goyn cusub oo la xoojiyey oo loogu talagalay dadka lugeynaya, rogrogaya, iyo kuwa baaskiil wata oo leh nalalka geeska Jid-goyn, nalalka biligleynaya, iyo calaamadaha dadka lugeynaya
- Joogsiyada baska oo la cusboonaysiiyay oo leh Baarkinka Baska, fadhiyo, iyo iftiin
- Dhinaca Lugta oo dib u dhis lagu sameeyay oo la balaariyay oo lagu daray ka dagashada Gaariga Naafada (curp Ramps)
- Xariijimaha lagu beero geedaha dariiqyada
- Hagaajinta qulqulka iyo biyaha roobka



**Baadh koodka QR si aad u booqato mareegahayaga oo aad ka bixiso jawaab celintaada. Jawaabahaagu waxay naga caawin doonaan inaan si wanaagsan u fahanno baahiyaha bulshada hadda iyo mustaqbalka.**

**Xiriirka Mashruuca**


Drue Nyenhuis, Hogaaminta Wacyigelinta  
 N130st\_BitterLake\_HallerLake\_Project@seattle.gov | (206) 684-0250  
[www.seattle.gov/transportation/N130th-BitterLake-HallerLake](http://www.seattle.gov/transportation/N130th-BitterLake-HallerLake)




**Seattle**  
 Department of  
 Transportation

## NAKSHAD WADO LA SOO JEEDIYAY


### N 130th St: Greenwood Ave N ilaa Linden Ave N



### N 130th St: Linden Ave N ilaa Aurora Ave N



### N 130th St: Aurora Ave N ilaa 1st Ave NE



## WAQTIGA MASHRUUCA

| QORSHAYNTA    |                       | NAKSHAD       |                       | DHISMAHA        |                |               |
|---------------|-----------------------|---------------|-----------------------|-----------------|----------------|---------------|
| Qorshaha Weyn | Horumarinta Mashruuca | Naqshada Hore | Naqshada ugu dambaysa | Dhismaha ka hor | Inta lagu jiro | Isku soo duub |

↖ waxaan joognaa halkan

**Qorshaynta:** Dhameystiran  
**Naqshada:** way socota  
**Dhismaha:** Sida ugu dhakhsaha badan 2026